



UNITED NATIONS

NATIONS UNIES

Office for the Coordination of Humanitarian Affairs – Somalia

### Warbixinta Xaladda # 40 – 10 October, 2008

#### Is-bellea Guud ee ugu umiimsan

Xaaladda bini'admnimada ee Bartamaha/koofurta Soomaliya waa ay ka sii dartay toddobadkan marka loo eego toddobadkii tegey. Waxaa lagu dhaawacay degmada Marka labo ka mid ah shaqalaha QM sidoo kale waxaa magaalada Belet-Weyne lagu dilay mid ka mid ah shaqalaha bini'admnimada, ayna weheliso baaq lagu mamnuucayo hawlgalkii labo hay'adood oo ka tirsan hay'adaha gargaarka.

6dii October, magalada Marka waxaa lagu dhawacay labo xubnood oo ka mid aha shaqalaha xafiiska mashruuca adeegyada ee UNka, kaddib markii qarax kula dhacay meel 4 km u jirta magaalada Marka ee Xarunta Gobolka shabeelaha Hoose. Waxaana halkaas ku geeriyooday wadhii gaariga ay hayada soo kireysatay, wallow warbixinta shilkaas weli aan la soo dhameystirin. Sidaas awgeed waxay QM go'aansatay inay si ku-meel gaar ah qaar shaqaalaha ee ka mid ah meel kale uga rarto magaalada Marka. 7kii October, waxaa dabley aan la garanayn togteen oday u shaqayn jiray hay'adda cafimadka caalamiga ah (IMC) ee magalada Belet Weyne, gobolka Hiiran ka dib markii uu difaacay ka shaqeynta gobolka hiiraan hayadaha kala ah IMC iyo CARE. Tani waxay tirada shaqaalaha gargaarka ee lagu dilay Soomaaliya ka dhigaysa ilaa 23 qof ilaa bishii January. Heyadaha IMC iyo CARE wadajir waxay u hakiyeen howlahooda gargaarka ay ka wadeen bartamaha iyo koofurta Soomaliya ka dib markii 3da bishan ay kooxda Alshabaab soo saartay wareegto ku mamnuucayaan howlgalada hayadahaas dhamaan deegaanda ay ka taliyaan. Taas waxay saameyn ku yeelanaysaa tirada sii kordhaysa e u baahan samatabixinta laguna qiyaasay 3.2 million oo Somali ah, kuwaasoo xaladdooda dhinaca nafaqa-darridu ay meel aad u liidata imminka ku sugan tahay. Si gaar ah waxay u taabanee hawlaha dhinaca cafimaadka ee afar degmo oo ka tirsan Gobollada Bay iyo Bakool ee ay ku jiraan xarumaha cafimaadka oo ay ka fa'iidaystaan ilaa (ama lagu daweeeyo) 23,000 qofood. Sidaa si la mid ah hakinta hawlgalka CARE, waxay saameyn ku yeelan doontaa gaarsiinta gargaarka cuntada, biyaha iyo mashaariicda faya-dhawrka,, taasoo ugu yaraan ka faa'ideysanayey 1 million oo qof oo tabalaysan.

Dhamaan dhacdooyinkaas waxa ay niyab-jab ku rideen dhamaan hayadaha samafalka iyagoona ka soo saaray war-saxafadeedkii 6dii October, taas oo si wadajir u qoorya 52 hayadood oo samafal ah. "Waqti xadirkayn, Gobollada Bartamaha/koofurta Soomaaliya, ayaa intooda badan waxaa ka xanniban shaqaalaha Caalamiga ah ee hay'adaha dhinaca samafalka la xiriira." Waxayna hay'adaha aan dawliga aheyn (NGOs) ugu baaqeen dhammaan dhinacyada iska soo horjeed inay u oggolaadaan si aan shuruud ku xidhanayn howlaha gargaarka deg-dega ah.

Dhinaca kale war-saxafadeed uu ka soo saaray dhacdadii magaalada Marka, sii-hayaha isku-duwaha hawlaha gargaarka a.i. Graham Farmer wuxuu yiri; "talaabada ugu muhiimsan ee imminka wixi ka dambeeya la gudboon Qaramada Midobay, waa sidii ay ku badbaadin lahayn ammaanka shaqaalaha gudaha ka hawlgala; marka aan si dhab ah u fahamno sababtii ka dambaysay wixii dhacay iyo qaabka ay u dhacday, ayaa markaas wajihi karnaa sidii aan loo carqaladeyn habsami u socodka howlaha gargaarka. Dawladda (FKMG) ayaa ku baaqday in la sii daayo sharuud la'aan labada shaqaale ee MDM oo afduubka loogu haysto Bartamaha Soomaliya, kuwaasoo laga soo qafaashay 22ka September goob ka mid ah Kilinka Soomalida ee Itoobiya. Waxayna ka dhigeysaa tirade dadka la af-dubay ilaa 23, wadarta guud e ilaa bishii January kuwaasoo dhamaan lagu wada Af-duubtay gudaha dalka soomaaliya, iyadoo ilaa 12 ka mid ah weli la haysto.

7dii October, wuxuu gololaha Ammanka e QM isku raacay qaraar deg-deg ah oo u fasaxa in waddamadu Maraakiibta dagaalka , ciidammada badda iyo diyaradaha militariga ku isticmaali karaan biyaha Soomaliya, iyagoo si xayi ah uga hawlgali doona, qaadayana dagaal ka dhan ah burcad-badeedda xeebaha soomaaliya ee dhibaatooyinka lixaadka leh halkaas ka gaysanaya. Qaraarkaas oo tirsigiisu ahaa 1838, ayaa wuxuu waddamada ku boorinayaa inay ku biiraan dagalka ka dhanka ah burcad-badeedda Soomalida. In ka badan 60 markab, aya la af-duubay ilaa bishii January.

Waxaa sare u kacay tirada bukaanka laga helay cudurka shuban-biyodka((AWD) ee Bossaso, Puntland, iyadoo

ay qiyaastii korodhay ilaa 188 bukaan, toddobaadkan gudihiisa, labo qofna ay u dhinteen cudurka. Shuban-biyoodku (AWD), wuxuu si xad-dhaaf ah ugu sii badanayey dalka Somaaliya inta lagu guda jiro xilli-roobaadka (Deyr min September ilaa December iyo xilliga Gu 'ga min bartamaha-April ilaa bartamaha-June) taaso ay sabab u yihiin wasakhawga goobaha biyo-qabatinka ama keydka ah.

### **Gurmadka iyo farqiyada**

8dii October, waxay hay'adda Save the Children UK, ugu deeqday noocada daawooyinka Dextrose (50ml) oo 250 dhalo ku jira iyo 80 dhalo oo noca saline (500ml) si logu maareeyo bukaanka cudurka shuban-biyoodka(AWD) ee ku jira xarunta daaweynta cudurka daacuunka ee cisbitaalka Bossaso.

Kaddib markii uu yaraday xaddigii cuntooyinka nafaqada leh ee Corn Soya Blend (CSB), oo gaarayey ilaa 2,000 metric tons oo sida la filayey la qaybin lahaa bisha October (intii loogu talar galay in bisha October la qaybiyo waa 4,000 metric tons), ayaa waxay hay'adda WFP mudnaan gaar ah siisay raashin buuxa oo ay ka faa'iidayaan karaan ilaa 213, 560 qof oo qayb ka ah barnaamijyada caafimaadka ee quudinta dheeraadka ah ee xarumaha hooyada iyo dhallaanka. Ilaa 90,000 qof oo ka faa'iideysaney barnaamijka quudinta waxbarashada waxa ay helayaan kala bar qorshahii loogu talagalay.

**Faahfaahin dheraad ah xogta Afka Ingriiska kala soo xidhiidh: Rita Maingi tel. 254 734 800 120 – [maingi@un.org](mailto:maingi@un.org),  
Xogat Af-Somaaliga kala soo xidhiidh: Mona Mohamed on 0733 643 737 – [mohamed26@un.org](mailto:mohamed26@un.org)  
WCinwaanka shabadda: <http://ochaonline.un.org/somalia>**